

## **Tallaalada Looga Hortagayo COVID-19 Ka**

Sidaad ogtahay Coronavirus, oo sidoo kale loo yaqaan COVID-19, waa cudur khatar ah oo ku faafay waddan kasta oo adduunka ah. Halkan Jasiiradda Rhode, in ka badan 85,000 oo qof ayaa ku xanuunsaday COVID-19, ku dhowaad 1,800 oo qof ayaa u dhintay COVID-19.

Tallaalo ayaa loo sameeyay si looga hortego dadku inay qaadaan COVID-19, waxayna bilaabayaan inay qaybiyaan talaalada.

Tallaalku waa shey ka caawiya jidhka qofka inuu soo saaro difaac ka mid ah cudur, taas oo ah, mar haddii qofku qaato tallaal, wuxuu la kulmi karaa cudurka isaga oo aan qaadin.

Tallaal ku waa muhiim, maxaa yeelay ma aha oo keliya inuu difaaco qofka tallaalka qaadanaya, laakiin wuxuu kaloo gacan ka geysanayaa inuu ka ilaaliyo cudurrada inuusan ku faafin dadka kale, sida xubnaha qoyska, deriska, ardayda aad isku fasalka tiihin, iyo xubnaha kale ee bulshadaada.

Tallaallada cusub ee COVID-19, ayaa si adag loo baadhay si loo ilaaliyo fayoobida, ka hor inta aan loo oggolaan in laga isticmaalo Mareykanka. Tallaallada COVID-19, kuma jiraan fayras nool, kumana jiraan halista inuu cudur ku rido qofka la tallaalay.

Tallaallada COVID-19, ee laga isticmaalo Mareykanka, waxay u baahan yihiin laba tallaal. Talaalka koowaad wuxuu bilaabayaan dhismaha difaaca, laakiin qof kastaa waa inuu soo noqdaa toddobaadyo kadib; kan labaad si uu u helo difaaca ugu badan ee tallaalku bixin karo.

Dadka badankoodu ma qabaan dhib halis ah tallaalka kadib. Dhibaatooyinka qaarkood ee dadku soo arkeen ayaa ah gacantaada oo laga yaabo inay xanuun dareento, casaan ama diirran tahay taabo shada [marka la taabto]. Calaamadahaasi [symptoms ku] badanaa waxay iskaga baxaan isbuuc gudihii. Dadka qaar waxay soo sheegaan inay yeeshan madax xanuun ama qandho markay helayaan tallaal. Dhibaatooyinkan soo raaca waa calaamat muujinaysa in nidaamkaaga difaaca uu si sax ah u sameynayo wixii la rabay inuu sameeyo. Waxay shaqeyneysaa oo ay dhiseysaa [awoodaada] kahortaga cudurka.

Qiyaasta tallaalka ee lagu soo iibsaday doolar canshuur bixiye Mareykan ah ayaa qof walba la siin doonaa iyada oo aan wax kharash ah ku bixin si kastaba ha noqotee, bixiyeyaasha tallaalka waxay awoodi doonaan inay ka qaadaan khidmadda maamulka tallaalka **qof kale**. Bixiyeyaasha tallaalku waxay ku heli karaan khidmadden bukaan-socodka caymiska dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay ama, bukaannada aan Caymiska lahayn, oo ay bixiso Sanduuqa Taakulaynta Bixiyeyaasha ee Kheyraadka Caafimaadka iyo Adeegyada.

Gobol kasta wuxuu leeyahay qorshe u gaar ah, kan ugu horeeya ee la talaalayo iyo sida loo qeybin doono talaalada. *Shaqaalaha daryeelka caafimaadka* iyo waayeelka, ayaa marka hore la tallaalayaa. Marka laga gudbo qeybintaan bilowga ah, Gobolka Rhode Island, wuxuu soo saari doonaa tilmaamo dheeraad ah maalmaha soo socda. Ka raadi macluumaad dheeraad ah: **www.C19vaccineRI.org**.